



DUGSIGA SARE EE WILSON

Wuxuu U Hanweyn Yahay Taariikhdiisa Heerka Sare ah



Dugsiga Sare ee Wilson wuxuu leeyahay taariikh heer sare ah una hanweyn yahay. Marka laga yimaado manhajka waxbarasho ee tay'adiisa sida weyn looga soo shaqeyey, dugsigan Wilson wuxuu bixiyaa maadooyin heerkoodu sareeyo ahna heer jaamacadeed iyo fasalada la horumariyey ee jaamacada(Advanced Placement). Waxa uu sidoo kale bixiyaa barnaamijyada farshaxanka Jilitaanka iyo Muuqaalka, Sayniska Kumbuyuutarka, Barashada Warbaahinta Dijitalka ah iyo Barashada Farsamada Gacanta.

Dugsiga Sare ee Wilson wuxuu siiya ardeyda maadooyin aad u sareeya, isla markaana dhiirgaliya koritaanka garashooda iyo inay waxbarashada heer sare ka gaaraan, iyadoo uu siinayo ardeyda fursado sidii ay ugu wanaagsanaan lahaayeen farshaxanka iyo una horumarin lahaayeen hibadooda.

Tacliinta

- **Fasalada La Horumariyey ee heerka jaamacada/Maadooyinka Heerkoodu Sareeyo:**
In ka badan 21 maado ayey ardeydu ku diyaariyaan imtixaanada Maadooyinkooda Heerka Jamaacada(AP) ama la siiyaa manhaj heerkiisu sareeyo, waxaa ka mid ah Ingiriisi, Suugaan iyo Curinta, Farshaxanka Istudiyaha(Studio Arts), Sawirka(Drawing), Luqada Isbaanishka, Xisaabta Kalkulaska(Calculus), Staatisks(Statistics), Taariikhda Dunida(World History), Taariikhda Maraykan(US History), Siyaasada iyo Dawladnimada (Government and Politics), Dhaqaalaha (Micro/Marco Economics), Cilmi Nafsiga(Psychology), Bayoolaji(Biology), Fiisigis(Physics)iyo Kimistari(Chemistry)
- **Farshaxanka Jilitaanka iyo Sawirada:** 47 Maadadood
- **Ardeyda Fasalka 9aad** waxaa loo ogolaadaa in iyaga oo kooxo ardey kooban ah ay si wada jir maadooyinka manhajka muhiimka u ah u wada qaataan(Taariikh Dunida, Luqada Ingiriiska, Caafimaadka iyo u Diyaargarowga Shaqada iyo Jaamacada), si loogu dhib yareeyo xaaladooda kala guurka ee dugsiga sare.
- **Fasalo faro badan oo aad kala dooraneyso** waxaa ku jira Injineerinka Codadka(Sound Engineering), Barashada Jimicsiga Yoga(Yoga/Mindful Studies), Warbaahinta Dijitalka ah iyo Naqshadeynta Kumbuyuutarka(Graphic Design), Fasal lagu barto farsamada Faarada iyo Biraha(Woods and Metal), Cilmi Nafsiga(Psychology, Sayniska Kumbuyuutarka(Computer Science), Sawir-qaadida(Photography),qeyb xisaabta ka mid ah(Math Modeling and Dynamic Systems), iyo Fasalada Saynis Heerkiisu sareeyo(Advanced Science)

Wuxuu Ku Faano Dugsigan Wilson

- Maktabad Qaali ah, oo leh shaqaale joogta ah oo khabiir ah.
- Sanad kasta, ardeyda Wilson waxaa loo doortaa Barnaamijyada Tababarka Aqoonta Injineerinka iyo Sayniska(Appenticeships in Science and Engineering Program-ASE)
- In ka badan 60 naadi oo la xiriira Tusaale Qaramada Midoobay(Model United Nation),kooxda ciyaarta saxanka la tuuro(Ultimate Frisbee), Jeska iyo animeeshan(anime and chess), iyo Kooxda Roobaatka(Robotics to Earth Club).
- Manhaj shan sano ah oo Sayniska Kumbuyuutarka ah.
- Boqolkiiba 87 ardeyda ka qalin-jabisaa waxay ay tagaan Jaamacadaha. Ardeydii ka qalin-jabisay Wilson waxay hadda wax ka bartaan Jaamacadaha/Kulliyadaha sida,Portland Community College, Bowdoin, Brown ,Carnegie Mellon, University of Chicago, Northwestern, Harvard, Yale, OSU, University of Oregon, Stanford, Vassar, University of Washington iyo West Point.
- Ururka Waalidiinta iyo Macalimiinta(PTA),Sanduuqa Gargaarka(FOUNDATION).Naadiga deeq ururinta dugsiga ee waalidiinta iyo ardeydii hore wax uga baran jiray,Naadiga deeq ururinta farshaxanka jilitaanka iyo muusiga,Naadiga Trojan Touchdown iyo Bulsho dareen fiican oo adag leh.
- Dhismaha labanka ka sameysay ee dugsiga Wilson oo baaxadiisu tahay 20 ikar,kaasi oo leh garoon kubada gacanta kuna qalabeysan nalal wanaagsan,wuxuu leeyahay oo kale goobihii lagu ordayey oo cimilo kasta la isticmaali karo iyo doogii la dhigayey, goobihii lagu ciyaarayey kubada miiska iyo goobtii dabaasha oo ka mid ah Portland Parks Outdoor pool.



HIMILADAYADU WAXAY TAHAY:
IN AAN WAX BARNO
AWOODAYADU INTA AY
GAARSIISAN TAHAY

**MASKAXEED
JIREED
RUUX AHAAN**

DHIIRIGELINTA AWOODA CAQLIGA
ARDEYDU WAA UDUB-DHEXAADKA
IN AY CAADO KA DHIGTAAN SIDII
MASKAXDOODA IYO QALBIGOODA
UGU OGOLAAN LAHAAYEEN INAY SI
QOTO DHEER UGU HAWLGALAN
INAY CAGTA SAARAAN NOLOL
MACNO LEH, WAX SOO SAARNA LEH



WILSON



Dugsigan Wilson wuxuu yahay meel aniga aad iigu haboon, sababtoo ah imisa fursadood oo maadooyin iyo manhaj dheeraad ah ayuu leeyahay." Dugsiga Wilson waa iskuul aad laguugu soo dhaweynayo ahna goob aad u xiiso badan. Waxaan kula kulmay iskuulkan qaar ka mid ah saaxiibadeyda ugu fiican iyadoo aanan waligay ka calaalci doonin in wax ka bartay dugsigani sare- Dugsigan Wilson waa ka iga dhigay maanta qofkan aan ahay!

— Olivia Falls-Kulak, Class of 2016



Naadiyada Ciyaaraha iyo Ciyaaraha PIL 6A

Dugsigan Wilson wuxuu dhiirgeliyaa ka qeybqaadashada barnaamijyada ciyaaraha kala duwan ee heerkoodu sareeyo ee sanad-dugsiiyeedka. Dugsigan Wilson ciyaaraha kale duwan ee uu bixiyaa waxaa weeyaan baseball, basketball(kubada koleyga), cheer(taageerayaasha ciyaaraha), Cross Country(orodada dhaadheer), football(kubada gacanta), golf, soccer(kubada cagta), softball, swimming (dabaasha), tennis(kubada miiska), track and field(orodada gudaha iyo bannaanka), volleyball(kubada laliska) iyo wrestling(legdinta), sidoo kale naadiyada lacrosse, sailing (badmaaxid), skiing (ciyaar ka mid ah kuwa barafka) iyo snowboarding, *Sanadka oo dhan waxaad ka heli kartaa caws artifishal ah oo la dhigo dhammaan cimiloyinka.*



Fursadaha Farshaxanka

Barnaamijyada farshaxanka ee Wilson bixiyaa waa fursad ay ardeydu hore ugu marinayaa xiisahooda iyo hibooyinkooda 47-ka farsahxanada muuqaalka, riwaayadaha iyo koorsooyinka muusikada.

- **Theater(Golaha jilitaanka):** Stagecraft(xirfadaha qoritaanka sida riwaayadaha loo jilo)/Technical Theatre(Farsamada Masraxa), Directing and Drama Production(Soo Saarista iyo Maamulka Riwaayadaha)
- **Instrumental Music(Sida loo duubo muusikada iyo curintooda)** Beginning Band(Koox bilow ah), Concert Band(Kooxda Riwaayadaha), Jazz Band(Kooxda Jaaska), Orchestra(Kooxda orjasteraha), Guitar(Giitaarka), iyo Music Thoery(Aragtida dhismaha Muusiga).
- **Choral/Vocal Music(Isku Jiibinta heesaha/Heesida koox ahaan)** Gabdhaha Wilson, Wiilasha Wilson, Wilsingers and Wilson Advanced Vocal Ensemble(WAVE)-(Heesayaasha Wilsingers iyo Kooxda Codka sare ee Wilson).
- **Visual Arts(Farshaxanada Muuqaalka):** Wargeyska Ardeyda, Buuga Sanadka, Naqshadeynta 3D, Sawirka, barashada rinjiyeynta, barashada dhoobo-sameynta, Sawir-qaadista, Qaabeynta Warbaahinta iyo Farshaxanka sare.

Diyaargarowga Shaqada iyo Jaamacada/Kulliyada

- **Dual-Credit(Qaadashada Maadooyinka Dugsiga Sare iyo Kulliyada):** Ardeydu waxay qaadan karaan maadooyinka kulliyada iyaga oo wax ka baranaya dugsiga sare, waxaa ka mid ah inay qaataan casharada fasalada ka baxay Portland Community College. Waqtigan xaadirka ah waxaan bixinaa 14 koorso oo iyaga oo dugsiga sare wax ka baranaya ay helaan koorsooyinka kulliyada hal mar.
- **Career Technical Education(Waxbarashada Xirfadaha Farsamada):** Ardeydu sidoo kale waxa ay sahamin karaan iyagoo baranaya maadooyinka gacanta laga qabanayo fasalka dhexdiisa sida Injineerinka Codeynta, Soo Saarista Fiidiyaasha, Naqshadeynta sawirada, manhaj shan sano ah oo barashada sayniska kumbuyuutarka iyo kuwa kale oo badan.

Wilson High School

1151 S.W. Vermont Ave. • Portland, OR 97219 • 503-916-5280
www.pps.k12.or.us/schools/wilson